

Isbarbardhiga Tallaallada COVID-19

	Pfizer	Moderna	Johnson & Johnson
Taariikhda Oggolaanshaha degega ah (EUA)*	Diisembar 11, 2020	Diisembar 18, 2020	Feebaraayo 27, 2021
Qiyaasta	Laba garoojo, ay u dhaxayso 21 maalmood	Laba garoojo, ay u dhaxayso 28 maalmood	Hal garoojo
Waqtiga la buuxinayo ilaalinta buuxda	Laba toddobaad kadib durmada labaada	Laba toddobaad kadib durmada labaada	Laba toddobaad kadib durmada koowaad
YAA qaadan kara <i>La hadal dhakhtarkaaga haddii aad uur leedahay ama aad naas nuujiso, ama haddii aad leedahay xasaasiyad daran.</i>	Dadka jira 12 iyo wixii ka wayn	Dadka jira 18 iyo wixii ka wayn	Dadka jira 18 iyo wixii ka wayn
Maxay qabanaysaa	Tallaalka wuxuu ka kooban yahay messenger RNA (mRNA). mRNA waa sida buug tilmaame ah. Waxay jidhkaaga baraysaa sida loo sameeyo borotiin aan dhib lahayn (borotiin kiciye ah) oo u eg	Talaalku wuxuu ka kooban yahay messenger RNA (mRNA). mRNA waa sida buug tilmaame ah Waxay jidhkaaga baraysaa sida loo sameeyo borotiin aan dhib lahayn (borotiin kicin) oo u eg	Tallaalku wuxuu ka koobanyahay fayras qabow oo aan dhib lahayn oo ay ku jirto DNA oo lagu sameeyo borotiin aan dhib lahayn oo u eg borotiin (borotiin kicin) oo kujira

	borotiin ku jira koronavirus-kan. Borotiinka kor u kiciya ayaa lagu soo bandhigayaa dusha sare ee unugga. Jirkaaga ayaa ka jawaab celiya borotiinka wuxuuna abuuraa unugyo ka hortagga cudurka iyo unugyada difaaca jirka ee aqoonsan kara lana dagaallami kara koronafayraska.	borotiin ku jira koronavirus-kan. Borotiinka kor u kaca ayaa lagu soo bandhigayaa dusha sare ee unugga. Jirkaaga ayaa ka jawaabaya borotiinka wuxuuna abuuraa unugyo ka hortagga cudurka iyo unugyada difaaca jirka ee aqoonsan kara lana dagaalami kara koronafayraskan.	koronafayras-kan. Borotiinka kor u kaca ayaa lagu soo bandhigayaa dusha sare ee unugga. Jirkaaga ayaa ka jawaaba borotiinka wuxuuna abuuraa unugyo ka hortaga cudurka iyo unugyada difaaca jirka oo aqoonsan kara lana dagaallami kara kansarka.
Maxayna qabanayn	Midna tallaalada ma beddelayo DNA-gaaga ama walxaha hide-sidaha Ma gelaan bu'da unugyadaada (halkaas oo ay DNA-daada ku nooshahay) Ma keenaan madhalaysnimo		
Maxaa ku dhex jira	Tallaalku wuxuu ka kooban yahay mRNA iyo maaddooyin ka caawinaya shaqada mRNA ee jirkaaga: dufanka, macdanta, iskudhiska dabiiciga ah si looga ilaaliyo mRNA-da aashitada badan, milix, iyo sokor.	Tallaalku wuxuu kakooban yahay mRNA iyo maaddooyin ka caawinaya shaqada mRNA ee jirkaaga: dufanka, macdanta, iskudhiska dabiiciga ah si looga ilaaliyo mRNA-da aashito badan, milix, iyo sokor.	Tallaalku wuxuu ka kooban yahay adenovirus wax laga beddelay (nooc fayras qabow laakiin aan ku jirin DNA-da fayraska qaba) oo leh macluumaadka koronafayras kujira. Waxa kale oo ku jira maaddooyin ka caawinaya inuu tallaalku xasilloonaado: cusbo, sonkor, iyo waxyaabo kale ee dabiiciga ah.
Maxaan ku jirin	Midna tallaalada kuma jiro koronafayras, kumana siin karaan COVID-19. Kuma jiraan ukumo, ilaaliyayaal, cinjir, unugyada uurjiifka, ama doofaarka ama wax soo saarka xoolaha kale. Tallaalada COVID-19 kuma jiraan jiiib lagu dabagalo dadka.		
Siday wanaagsan ayay u shaqeeyaan	Dhammaan seddexda tallaal ee la oggol yahay ayaa la baaray si loo hubiyo inay nabdoon yihiin. Dhammaantood waxay waxtar u leeyihiin kahortagga jirro halis ah, isbitaal dhigis, ama u dhimasho COVID-19.		
*Xaaladda degdegga ah ee caafimaadka bulshada, soosaarka iyo oggolaanshaha tallaallada waxay noqon karaan oo si toos ah loogu saarey Ruqsadda Adeegsiga Degdegga ah (EUA). EUA saamayn kuma yeelanayso badbaadada talaalka, waayo saameyn kuma laha horumarinta. Taa baddalkeeda, waxay dedejisaa soo saarka iyo howlaha siinta. Shirkadaha ayaa bilaabi			

kara soo saarida tallaalka waayo wali waxay ku jiraan horumarinta ama tijaabada. Dhammaan tallaallada waxay raacaan isla nidaamka baaritaanka, haddii loo oggolaado isticmaalka degdegga ah ama loo maro nidaamka oggolaanshaha caadiga ah.

Yaa ka qaybqaatay Wejiga 3aad ee Tijaabooyinka Caafimaad

	Pfizer	Moderna	Johnson & Johnson
Tirada mutadawaciinta	Ku dhawaad 45 000	Ku dhawaad 30 000	Ku dhawaad 40 000
Jinsiga/Isirka	Madow ama Afrikanka Maraykanka 10% Isbaanish/Laatiin: 26% Asiyaan 5% Dhalad Maraykan: 1,3%	Madow ama Afrikanka Maraykanka: 10% Isbaanish/Laatiin: 20% Asiyaan 4% Dhalad Maraykan: 1,3%	Madow ama Afrikanka Maraykanka 19% Isbaanish/Laatiin: 45% Asiyaan 2,6% Dhalad Maraykan: 9%
Heerka Da'ada	12 – 56+ 21% ayaa ahaa 65+	18 – 65+ 25% ayaa ahaa 65+	18 – 65+ 20% ayaa ahaa 65+
Xaaladaha Caafimaad ee Hoos Yimaad <i>Boqolleyda ka qaybgalayaasha tijaabada caafimaad ee lahaa ugu yaraan hal xaalad caafimaad oo kordhinaysa halista cudurka daran ee COVID-19 , sida cayilka, sonkorowga, cudurrada sambabka, ama dhiig karka</i>	Ku dhawaad 46%	Ku dhawaad 26%	Ku dhawaad 38.7%
Ka qaybqaadashada Caalamiga ah	76.7% ka qaybgalayaasha waxay ahaayeen Maraykan, 15% waxay ahaayeen Arjantiin, 6.1% waxay ahaayeen Barasiil, iyo 2% waxay ahaayeen Koonfur Afrika.	Moderna waxaa kaliya lagu tijaabiyay Maraykanka	Qiyaastii 47% ka qaybgalayaasha daraasadda waxay ka yimaadeen Mareykanka, 17.3% Brazil, 12.7 % Koonfur Afrika, inta hartay Chile, Argentina, Colombia, Peru, iyo Mexico

Helitaanka dukumiintiga: Dadka naafada ah ama shaqsiyaadka ku hadla luuqad aan ahayn Ingiriis, OHA ayaa bixin karta xogta oo lagu heli karo qaabab kale sida ayadoo turjuman, far waawayn ku qoran, ama farta indhoolka ku qoran. La xidhiidh Xarunta Macluumaadka Caafimaadka Iambarka 1-971-673-2411, 711 TTY or COVID19.LanguageAccess@dhsosha.state.or.us